

<p><b>Tucson, Arizona</b></p> <p><b>UJEEDDADA GUDDIGA XUKUNKA</b></p> <p><b>GOVERNING BOARD POLICY</b></p>	CINWAANKA UJEEDDADA: Gudbinta, Dib-u-reebka iyo Horey-u-dadajinta Ardeyda
	KOODH UJEEDDO: IKE
	WAAXDA HOGGAANKA: Waxbarashada Wanaagsan

### **Gudbin**

Ardaydu waxay uga gudbayaan heerka darajada fasalka marka ay muujiyaan kobac waxbarasho iyo markay la kulmaan iyo/ama marka heerka darajada laga rabo/Manhaj Nuxur Gobol iyo Degmo ay kor u dhaafaan. Waajibaadyada laga rabo ardayda inay gaadhaan waxa ku jira wax ka-qabasho dhinaca ah luqadda, suugaanta, xisaabta, saayniska, cilmi bulsheedka, muusiq, farshaxanka aragtida, waxbarashada caafimaadka/jimicsiga iyo luqadaha ajinabiga iyo luqadda dadka u dhashay Maraykanka ee lagu ansixiyay Gudduga Waxbarashada ee Gobolka.

### **Dib-u-reeb**

Dib-u-reebka ardaydu waa nidaam la raaco marka macallinku(miintu), iyada ooy la-tashanayaan waalidka, ayay u garanayaan ardaygu inuuna muujin gaadhitaan waajibatkiisii laga rabay, iyada oo danaha ugu wanaagsan ee ardayga la eegayo. In kasta oo darajooyinka hore lagu taliyo inay yihiin wakhtiga ugu habboon, hase yeeshe dib-u-reebku waxa la qaddarin karaa darajo kasta.

### **Horey-u-Dedajin**

Horey-u-dedajintu waa nidaam gudbin labanlaabanta ama u meelayn darajo sare iyada oo sal looga dhigayo kartida ardayga waxbarashadiisa, iyo waliba:

- da'da
- waayeelnimada
- xirfadaha waxbarasho
- isku-kalsoonida
- Heerka darajo
- anshaxa iyo
- arrimaha kale ee la xidhiidha wanaagga guud ee ardayga.

Horey-u-dadajintu ma saamayso kindergarten-ka iyo ardayda darajada fasal 1<sup>aad</sup>. Fadlan fiiri ujeeddada # JEB DA'DA WAXBARASHO-BILOWGA LOOGA BAAHANYAHAY

### **Waxbarashada Gaarka Ah**

Waxa intaa u dheer waxa korka ku yaal, go'aannadan oo kale, marka loo eego ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah, ayaa loo eegi doonaa iyada oo ku saleysan mid-mid ahaan, iyada oo raacaysa qorshaha waxbarashada shaqsiyada ahaanta oo raacaysa A.A.C. R7-2-301 and R7-2-401.

### **Barteyaasha Luqadda Ingriisiga (ELL)**

Degmadu waxay kula isticmaali doontaa xeelado qiimayn iyo ka hor tag ah Barteyaasha Luqadda Ingriisiga oo aan tixgalinayn arrimaha luqadda ah marka la go'aaminayo dib-u-reebka. Ka hor taggu waxa loo dajiyay sidii ardayda loo siin lahaa gacan-siin dheeraad ku nuuxnuuxsi ah sidii Ingriisiga loo baran lahaa iyo sidii loo heli lahaa aqoonta waxbarashada nuxurka ku jira.

### **Rafcaanka laga Qaadanayo Go'aanka Macallinka ee Gudbinta, Dib-u-reebka, Bixista ama Rididda Ardayga**

Iyada oo la raacayo Qawaaniinta Dib-loogu-fiirsaday ee Arizona, waalid ama ardayga qaan gaadhka ah (18 sano jir) ayaa laga yaabe rafcaan u qaadan kara Guddiga si dib loogu eegi lahaa arrimaha go'aanka gudbinta, dib-u-reebka, bixitaanka ama rididda. Ardaygu iyo/ama waalidku waa inay soo hor dhigaan Gudiiga Xukunka caddayn in ardaygu u si fiican ula qabsaday aan uun/ayna ula qabsan marka la eego arrimaha ay ansixiyeen Guddigu Gobalku ee ah waxa laga rabo heerka darjadaas gaarka ah. Haddii Guddiga Xukunku ku raacaan ama diidaan go'aanka macallinka, guddoomintaa go'aanka oo qoraan ayay qaadan doonaan Guddiga Xukunku ooy siin doonaan waalidka iyo ardayga qaan gaadha.

La ansixiyey: April 11, 2006

Dib looga shaqeeyey:

Dib loogu fiirsadey:

**TIX-RAAC SHARCI:** A.R.S. [15-203](#) Awoodaha iyo Waajibaadyada

[15-341](#) Awoodaha iyo Waajibaadyada Degmada Dugsiga

Guddiyada Xukunka

[15-342](#) Awoodaha Liic-liicsami kara

[15-521](#) Awoodaha Macallimiinta

[15-701](#) [15-701](#) Dugsi u Dhaxays, Gudbinta, Waxa looga

Baahanyahay

[15-701.01](#) Dugsiga Sare, Gudbinta, Waxa looga Baahanyahay

[15-715](#) Gargaarka Waxbarasho Gaar ee Kindergarten-ka iyo 1-3

A.A.C. [R7-2-301](#) Ugu Yaraan Koorsada Waxbarashada iyo Hadafyada Xirfadaha

[R7-2-401](#) Tiigsiyada Waxbarashada Gaarka ah<0}

**Iskaga-gudub Tix-raac:** # Ujeeddada JEB Da'da laga Rabo Galitaan (Dugsi)

Waxa u beddleyaa Ujeeddooyinka TUSD # 5110 Gudbinta